



801 S. Fidalgo St., Suite 100
Seattle, WA 98108

Salaam Tukwila!

Gaariga Qashinka ee Cusub
Dib-u-warshadeynta, Qooshka,
iyo Adeegyada Qashinka ee Cusub
[Recology.com/Tukwila](https://www.recology.com/tukwila)



CUSUB! Laga bilaabo 1-da Nofeembar, 2023

Dib-u-warshadeynta Qashinka Cuntada & Dayrka ee Ganacsiyada iyo Qoysaska Kala Duwan ee Magaalada Tukwila, iyo Adeegyada Qashinka ee Shirkadda Recology

Keydso Hagahan



Ganacsiyada, dabaqyada, iyo guryaha iskaashatada ee Tukwila

Laga bilaabo 1-da Nofeembar, 2023, Recology waxay noqon doontaa shirkadda qashinka dib-u-warshadeysa, qashinka cuntada & deyrka ee cusub, iyo shirkadda qaada qashinkaaga. Magaalada Tukwila iyo Shirkadda Recology waxaa ka go'an in si habsami leh ay uga wadashaqeeyaan kala guurka. Shaqaalaha adeegga macaamiisha ee deegaanka iyo kooxaha hawlgallada ee shirkadda Recology ayaa diyaar u ah inay ku caawiyaan adiga iyo inay ku siiyaan adeeg tayo sare leh.

Fadlan ka wac xarunta adeegga macaamiisha ka hor 1-da Nofeembar lambarka 206.994.3900 ama booqo [Recology.com/Tukwila](https://www.recology.com/tukwila) si aad uga samaysato koontadaada oo aad u xaqiijiso macluumaadkaaga. Waa kuwan waxa aad filan karto inta lagu guda jiro kala guurkan:

- **Qalabka (carabiyadaha/haamaha qashinka/isrogeyaasha/mashiinada qalabka lagu kuuso qashinka) iyo calaamadaha qashinka**
Waxaad haysan doontaa qalabka aad hadda haysato. Midabada loogu talagalay nooc kasta oo shay ah ayaa sidooda ahaan doona. Laga bilaabo bisha Sebteembar, shaqaalaha shirkadda Recology ayaa dib u calaamadayn doona qashinkaaga, carabiyadaada, ama weelasha qashinka.
- **Agabyada la aqbal**
Dib-u-eeg liisaska dib-u-warshadaynta qashinka iyo qashinka cuntada & kala soocida qashinka deyrka ee aan samayno ee ku qoran calaamadaha qashinka ee cusub kuna jira onlaynka iyagoo ku qoran luuqado badan. Daabac hagayaashaan si aad u dhejiso ama aad u geliso onlaynka oo ay u arkaan shaqaalaha ama degganeyaasha: [recology.com/recology-king-county/tukwila/sorting-guides/](https://www.recology.com/recology-king-county/tukwila/sorting-guides/)
- **Sicirada**
Dib-u-warshadaynta sii ahaan doontaa bilaash taas oo qayb ka ah adeegga qashin ee lagu siiyo. Adeegga qashinka cuntada & deyrka ee loogu talagalay uruurinta qashinka cuntada ayaa sii doona bilaash sannadka ugu horreeya marka aad iska diiwaangeliso inaad noqoto macmiilka cusub ee qashinka cuntada iyo deyrka. Sicirada hadda jira ee qashinka cuntada iyo deyrka ayaa kordhi doona iyadoo ugu wacan tahay qiimaha kor u kacaya ee gawaarida qashinka, shidaalka, shaqaalaha, iyo arrimaha kale. Sicirada ayaa kordhi kara haddii la galayo qandaraas kasta ee cusub ee loogu talagalay gaariga qashinka, waxayna hadda la jaanqaadi doonaan sicirada bulshooyinka kale ee Degmada King County.

Macluumaadka sicirka waxaa loo soo diri doona ciwaanada boosto oo dhan gudaha bisha Sebteembar, ama waxaad sicirada ka arki kartaa barta [Recology.com/Tukwila](https://www.recology.com/tukwila).

- **Faa'idooyinka cusub ee bisha Nofeembar**
Liiska faa'idooyinka cusub ayaa lagu soo daray hagahaan.
- **Biilasha**
Waxaad biilkaaga ugu horreeya ka heli doontaa shirkadda Recology gudaha bisha Diseembar. Waxaad awoodi doontaa inaad onlaynka ku bixiso biilasha barta [recology.com/bill-pay/](https://www.recology.com/bill-pay/)
- **Su'aalo? Ma jiraan isbeddelo adeegyo?**
Ka wac xarunta adeegga Recology lambarka 206.994.3900 ama booqo [Recology.com/Tukwila](https://www.recology.com/tukwila).



En Español visitar:

[Recology.com/Tukwilaoutreach](https://www.recology.com/tukwilaoutreach)

Adeegyada Qashinka iyo Faa'idooyinka Cusub ee Bilaabmaya 1-da Nofeembar, 2023



Faa'idooyinka iyo Adeegga Macmiilka ee La Ballaariyay

• Adeegga Macmiilka

Taleefoonka: 206.994.3900

Isniinta ilaa Jimcaha 7 SUBAXNIMO – 7 GALABNIMO
Sabtida iyo Axadda 8 SUBAXNIMO – 7 GALABNIMO

limaylka: Tukwila@Recology.com

[Recology.com/Tukwila](https://www.recology.com/tukwila)

- Hal sanno oo adeegga qoosh ka dhigista qashinka ee bilaashka ah ee loo heli karo ganacsiyada, dabaqyada, iyo guryaha iskaashatada.
- Astaamaha waxbarasho ee albaabka la suro iyo bacaha Dib-u-warshadeynta Saxda ah ee loogu talagalay guryaha qoysaska ee kala duwan si ay gacan uga geystaan yaraynta wasakhowga iyo qashinka.
- Calaamadaha waxbarashada iyo boorarka muujinaya qashinka dib loo warshadeyn karo, qoosh laga dhigi karo, ama qashinka laga ganacsado, qashinka dabaqyada, ama guryaha iskaashatada.
- Tababarka goobta qashinka ka dhaca ee ka samaynta qooshka, dib-u-warshadeynta, ama dhimista qashinka laga ganacsado.
- Kordhinta wacyigelinta ganacsiyada iyo dugsiyada.
- Gelitaanka Bakhaarka Recology/Xarunta Qashin Uruurinta ee Burien ee ku taala 15858 First Ave South.
 - Dabaqyada iyo guryaha iskaashatada waxay keeni karaan alaab aan caadi ahayn oo loogu talagalay dib-u-warshadeyn bilaash ah.
 - Booqo si aad u hesho ikhtiyaarka adeegga macmiilka ee fool-ka-foolka ah.
- Takhasuslaha Waste Zero ee Waqti-buuxa Shaqeyya iyo Takhasuslaha Adeegga Macmiilka ee Tukwila waxay la shaqayn doonaan dugsiyada, kooxaha bulsheed, ganacsiyada, iyo qoysaska kala duwan si ay uga caawiyaan bulshadaada inay dhimaan qashinka oo lacagna ku dhaqaalaystaan!



Gawaarida Qashin Uruurinta ee Cusub

- Gawaarida korontada ku shaqeyya ee loogu talagalay qaaddida carabiyada qashinka.



Faa'idooyinka Cimilada Xun ee La Ballaariyay

- Goobaha qashinka lagu qubo ee ku yaala Tukwila haddii cimilada xun ay qaataan wax ka badan hal toddobaad.
- Wacyigelinta dheeraadka ah ee macaamiisha ah ee khuseysa daahitaanada adeegga ee ka dhasha cimilada xun.

Maxay tahay shirkadda Recology?

Shirkadda Recology waa qashin-qaade iyo qashin-warshadeeye 100% ay shaqaaluhu leeyihiin.

Waxaan u adeegnaa 11-ka kale bulshooyinka Puget Sound oo ay ku jiraan Burien, Des Moines, iyo SeaTac. Hal ku dhigga shirkadda Recology waa *Duni Aan Qashin Lahayn*. Waxaan diiradda saareynaa wacyigelinta bulshada sida ay u yareeyan qashinka iyadoo loo marayo dib-u-warshadeynta saxda ah iyo qooshka qashinka. Shirkadda Recology waxay sidoo kale ka hawgashaa California iyo Oregon.

Sidee lagu doortay shirkadda Recology?

Magaalada Tukwila waxay qabatay geedi-socodka RFP oo loo loollamay waxayna soojeedino ka heshay shirkado badan. Shaqaaluhu waxay ku sameeyeen dib-u-eegis balaaran soo jeedinadan oo ay ku jiraan booqashooyinka goobaha shirkadaha, iyo wareysiyada kooxaha maamulka. Soo jeedinada ayaa markaa wax lagu go'aamiyay iyadoo la adeegsanayo qiimaha iyo adeegyada la bixiyay. Iyadoo loo marayo geedi-socodkan ayaa la xushay shirkadda Recology waxaana qandaraaska ansixiyay Golaha Magaaladda.

Halka Qashinka Laga Qaado Lana Geeyo

Si aad u hesho liiska dhammaystiran oo qashinka dib loo warshadayn karo oo qooshka looga dhigi karo gudaha Tukwila, booqo: [Recology.com/Tukwila](https://www.recology.com/Tukwila).



Si aad hagayaasha kala-soocida qashinka oo daabacan ugu hesho luuqado badan: [Recology.com/recology-king-county/tukwila/sorting-guides/](https://www.recology.com/recology-king-county/tukwila/sorting-guides/).

Yaree qashinka oo lacagna dhaqaalayso.



Taageerada bilaashka ah ee Kooxdeena Waste Zero

La xiriir kooxda shirkadda Recology ee Waste Zero si aad ganacsigaaga, dhismaha dabaqaaga, ama guryaha iskaashatada ugu soo biiriso ama kordhiso dib-u-warshadeynta ama qoosh ka dhigidda qashinka, yaraynta wasakhawga, iyo "yaraynta saxda ah" ee qashinkaaga.

Noogu soo dir iimayl barta: RKCWasteZero@Recology.com si aad ballan u qabsato!

TAAGEERADA FARSAMO

- Falanqaynta qashinka ee goobta qashinka
- Talooyinka adeegga la qaabeeyay
- Tababarrada iyo bandhigyada shaqaalaha

WEELASHA IYO CALAAMADAHA

- Weelasha gudaha ee midabka ku astaysan
- Calaamadaha weelasha
- Boorarka iyo hagayaasha kala-soocidda qashinka

Waa muhiim Dib-u-warshadeynta Saxda ah iyo Qooshka Saxda ah.

U FIICAN MEERAHA

- Dib-u-warshadeynta waxay yaraysaa qashinka, waxay dhaqaalaysaa tamarta, waxayna dhowrtaa kheyraadka
- Qoosh ka dhigidda qashinka ayaa gacan ka geysata la dagaalanka isbeddelka cimilada iyadoo wanaajiso ciidda iyo yaraynta qiiqa warshadaha gaaska

KEYDSO LACAG

- Qashin yar ayaa ka dhigan biil ama kharash yar
- Adeegda dib-u-warshadeynta ayaa ku jira oo kharash dheeraad ah lahayn oo qayb ka ah bilka qashinka
- Macaamiisha ganacsiga iyo guryaha qoysaska kala duwan waxay heli karaan hal sanno oo adeegga qashinka deyrka iyo cuntada ah oo lacag la'aan ah. Takhasuslaha Waste Zero ayaa ka caawin doona gurigaaga samaysashada akoonka iyo tababarka loogu talagalay kireystayaasha iy shaqaalaha. Kala soocida saxda ah ee qashinka dib loo warshadeeyo iyo qooshka laga dhigo waxay yarayn kartaa xajmiga weelka qashinka ee aad u baahan tahay waxayna hoos u dhigi kartaa bilkaada ama kharashkaaga!

Nala soo xiriir si aad u hesho caagga qashinka oo yar.
206.944.3900 | Tukwila@Recology.com
[Recology.com/Tukwila](https://www.Recology.com/Tukwila)

Maxay Tahay Waxaan u Baahanahay inaan Sameeyo?

1 La xiriir shirkadda Recology isla markiiba si aad ugu diyaargarowdo adeegga cusub markay tahay 1-da Nofeembar, 2023

Nala soo xiriir si aad u xaqiijiso macluumaadkaaga xiriirka iyo si aad u dejisato dookhyada lacag-bixinta ee aad rabto.

Taleefoonka Recology 206.994.3900
iimaylka Tukwila@Recology.com
mareegta [Recology.com/Tukwila](https://www.Recology.com/Tukwila)

2 Dib u soo dir foomka oo celi foomka koodhka iyo qufulka ugu dambeyn 1-da Oktoobar, 2023.

Haddii aad haysato koodhka albaabka, weelasha qashinka ee xiran, goobaha qashinka ee xiran, ama shuruudaha kale qashin uruurinta ee gaarka ah, fadlan buuxi foomka la socda oo dib ugu soo dir shirkadda Recology sida lagu faray.

Haddii shirkadda Recology aysan geli karin goobta ay yaalaan weelashaada qashinka ama aysan furi karin weelashaada qashinka, ma awoodi doonaan inay qaadaan qashinka markay tahay toddobadda 1-da Nofeembar.

3 Ha ogaato shirkadda Recology adeegyadaada gaarka ah

Haddii aad qabto shuruudo adeeg oo kale ama su'aalo kale oo gaar ah, fadlan nala soo xiriir ka hor 1-da Nofeembar si aad u hubiso in kuwani ay fahmaan kooxdeena hawlgallada.

4 Wax ka ogow adeegyadeena iyo halka qashinka laga qaado lana geeyo

Dib-u-eeg dukumeentigan si aad wax uga ogaato faa'iidooyinka badan ee uu leeyahay heshiiska shirkadda Recology. Saacadaha adeegga macaamiisha ee la dheereeyay, hal sanno oo qoosh ka dhigidda qashinka oo lacag la'aan ah, caawimaad farsamo, iyo tababarka ay bixiyaan shaqaalaha shirkadda Recology, iyo gacan ka geysashada wasakhawga iyo weecinta duugista qashinka ayaa dhammaantooda ah qayb ka mid ah faa'iidooyinka cusub ee ku jira Qandaraaska Recology.

Waxaad ku heli doontaa macluumaad boostada oo ay ku jiraan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan isbeddelada ku yimaada adeegyada shirkadda Recology.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa [Recology.com/Tukwila](https://www.Recology.com/Tukwila) si aad u hesho macluumaadka ugu cusub.



Dib-u-warshadeyn	Qashinka Cuntada & Deyrka	Qashinka
 Dhalooyinka caaga ah, tubbooyinka, jeeggaga, iyo dhalooyinka Dhalada Biraha Warqadaha iyo kartoonnada nadiifka ah	 Cuntada haraaga ah Baakadaha iyo jug-dhowraha fuushfuushka ah Baakadaha wasakhaysan ee cuntada Qashinka deyrka	 Bacda halka mar la isticmaalo Baakadaha iyo jug-dhowraha fuushfuushka ah Xafaayadaha iyo qashinka rabaayadaha (bacaysan) Dhoobka iyo quraaradaha